

## Somali

### Jimicsiga carruurta ee Ihmemaa

#### Maalmaha axadda saacadda 17–19

Jimicsiga carruurta Ihmemaa ee bilaashka ah wuxuu ku martiqaadayaa carruurta Turku ee da'doodu u dhaxayso 1-12 sano inay ku madadaaleeyaan! Ihmemaat waxaad fursad ka helaysaa jimicsi iyo ciyaaro badan oo qoyska oo dhan ah. Waxqabadka waa in la ilaaliyo, lama hagayo, markaa ilmaha waa in uu la socdaa qof weyn.

#### Xafiisyada waxaa laga heli karaa dhammaan Turku. Ku soo dhawoow jimicsiga!

Xafiisyada, saacadaha furitaanka iyo jadwalka gaarka ah: [turku.fi/ihmemaa](http://turku.fi/ihmemaa)  
Macluumaad dheeri ah tel. 050 554 6219

(Facebook-tunnus) Jimicsiga carruurta ee Ihmemaa

### Kooxaha jimicsiga ee carruurta iyo dhalinyarada

#### Toddobaadyada 36–49 iyo 2–18

Kooxaha waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhalinyarada u baahan taageere gaar ah xagga dhaqdhaqaaqa jirka, kuwaas oo raadinaya madadaallo ay jecelyihiin. Toddobaad kasta waxa jira kooxo jimicsi oo kala duwan oo aad kala kulmi karto farxad iyo rayn-raynta jimicsiga. Kaalay oo ka qayb qaado jimicsiga, qoob ka ciyaarka, ciyaaraha iyo dabaasha!

Macluumaad dheeri ah: [turku.fi/soveltavaliikunta](http://turku.fi/soveltavaliikunta) -> buugga xilliyeedka ee kooxaha jimicsiga ee carruurta.

### Jimicsi samee inta lagu jiro maalinta iskuulka

Xirfadaha jimicsiga aasaasiga ah iyo dhaqdhaqaaqyada la taaban karo gudaha iyo dibadda! Jimicsiga madadaallada bilaashka ah waxaa la abaabulaa maalmaha dugsiga ee toddobaadyada 36-49 iyo 2-18 (ma aha xilliyada fasaxa iskuulka) Weydii maamulaha naadiga iskuulka ama macallinka ilmahaaga wixii ku saabsan madadaallada iskuulkaaga.

Waxaad ka heli kartaa madadaallada gaarka ah ee iskuulka oo la soo koobay:  
[turku.fi/harrastelukkarit](http://turku.fi/harrastelukkarit)

## MIHI

#### Toddobaadyada 36-49 iyo 2-18 (ma aha toddobaadka 8).

MIHI waxa ay 12-19 jirka ee Turku ku siisaa ka badan 40 kulan oo isboorti bilaash ah. Isboorti badan oo shaqsi iyo kooxeed ayaa la helayaa. Isboortiga ka sokoow waxaad iskaa ugu taraarixi kartaa barafkaa iyo iskiinka Impivaara (qalabyada waa bilaash). Intaa waxaa dheer, inay dhallinyaradu fursad u haystaan inay ballan qabsadaan kubadda koleyga ah ee iskuullada Turku. Uma baahnid inaad hore isaga sii diiwaan galiso MIHI (marka laga reebo ciyaaraha billiard-yada iyo laysarka).

Macluumaad dheeri ah: [jorma.fisk@turku.fi](mailto:jorma.fisk@turku.fi) ama tel. 050 554 6250  
Fiiri: [mihi.fi](http://mihi.fi)

### Madadaallo baarista ee iskuullada

Iskuullada hoose-dhexe oo badan ee Turku ah ayaa qabanqaabiya madadaallo raadin ah. Adeegga waxa loogu talagalay ardayda iskuullada aada ee aan weli helin wax ay qabtaan wakhtiga firaaqada ee ay jecel yihiin. Xidhiidhiyaha iskuullada ee madadaallo raadiyaha wuxuu caawiyaa oo kula taliyaa ardayda inay helaan hiwaayad macno leh.

Macluumaad dheeri ah: [turku.fi/koulujen-etsiva-harrastustoiminta](http://turku.fi/koulujen-etsiva-harrastustoiminta)

### Kivaloma kulmilla

Kivaloma kulmilla waa madadaallo bilaash ah oo loogu talagalay carruurta da'da iskuulka hoose-dhexe ah ee xilliga fasaxa ku jira ee xagaaga, deyrta iyo jiilaalka. Waxqabadka ayaa laga soo abaabulay meelo kala duwan ee Turku ah.

Macluumaad dheeri ah waxaad ka helaysaa cinwaanka **[turku.fi/kivaloma](https://turku.fi/kivaloma)** ama cinwaanka Facebook Kivaloma